

Maarso 20, 2025

## **Dugsiga hoose Cedar Grove iyo Tucker High Shine iyo Guulaha la Taaban karo ee Feestada Filimka Qaranka Ee St. Louis**

Labo Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (*DCSD*) ayaa gaaray guulo weyn ee Ururka Taageerada Habdhaqanka Wanaagsan (*APBS*) Feestada Filimka ee la qabtay Maarso 14 inta lagu jiray shirka sannadlaha APBS ee St. Louis, Missouri. Aqoonsiyadaan ayaa waxaa dhammaantood looga mahadceliyay Dugsiga Hoose Cedar Grove ku guuleysiga qeybta “*Ka qeybgalka Dugsiga - Hoose*” iyo Dugsiga Hoose Cedar Grove oo lagu abaalmaryay qeybta “*Waxbarashada - Dugsiga Sare*”. Codeynada ka qeybgalayaasha Feestada Filimka APBS ayaa go'aamiyay labada guuleysi.

Feestada Filimka APBS ayaa soo bandhigo oo u dabaaldago dadaalada dugsiga iyo ururada ee sare u qaadayp Waxqabadka Habdhaqanka Wanaagsan iyo Taageerooyinka (*PBIS*) iyadoo loo marayo filimka, oo xooga la saarayo saameyn ta fiican ee dadaaladaan nolosha iyo ka qeybgalka ardayda. Mowduuca sannadkaan wuxuu ahaa “*Isku xirka Xiriirada iyo Wanaagsa*.” Ardayda waa inay abuurtaa filim muujinayo mabaadi’da aasaaska PBIS oo qeybaha labo filim—waxbarashada iyo ka qeybgalka dugsiga.

Filimka Dugsiga hoose Cedar Grove ayaa soo bandhigay dadaalada dugsiga ee *S.A.I.N.T.s Paradise*, kaasoo ku dhiirogeliyo ardayda inay ahaadaan kuwa leh *Taageero, Firfircooni, Madax banaani, Sharafeysan*, iyo *Aaminaad (SAINT)*. Ardayda muujiso tayooyinka “Super Saint” waxaa la siyyaa waqtiga ay ugu jiraan “Saints Paradise,” qol ka buuxo geemam iyo howlo meeshaas oo ay ku nasan karaan oo ay ugula raaxeysan karaan waqtii saaxibaddooda.

Filimka Dugsiga sare Tucker ayaa tilmaamayo filashooyinka hab dhaqanka dugsiga, gaar ahaan maqaayada kafeega. Dugsiga wuxuu isticmaalaa mascot, Tiger, si u ogeysiyo ardayda filashooyinkaan: *Jadwalka waqtiga, Daacadnimada, Badqabka, Ka qeybgalka*, iyo *Ixtiraamka*.

[DCSD](#), [Waaxda Adeegyada Gaarsiinta](#), iyo Kooxda PBIS ee Xiriirada Ardayda ayaa ugu hambalyeyay filim suubiyayaashaan da’dar ee xirfadeysan guushooda aadka u wanaagsan!

Ka fiiri labada filimaan ee guuleysanayo adoo riixayo linkiyadaan:

- [Dugsiga Hoose Cedar Grove](#)
- [Dugsiga Sare Tucker High](#)

XXX